

## Kawntiga Hennepin

# Soo koobidda Qiimaynta Caafimaad Saamaynta ee Tareen Mareenka Bottineau



Waxaa soo diyaariyey Crystal Myslajek

### **Kormarka Tareen Mareenka ee Bottineau**

Tareen mareenka degmada Bottineau (laynka buluuga ah ee tareenka METRO-ga), wuxuu siinahayaa fursad magaalada dhankeeda waqooyi-galbeedka ay ku helaan gaadiid tareen. Masaafada ah 13 mayl ee ah tareen mareenka degmada Bottineau, wuxuu ka bilaabanayaa bartamaha magaalada Minneapolis, wuxuu dhex marayaa magaalooyinka Golden Valley, Robbinsdale iyo Crystal, wuxuuna ku dhamaanayaa Brooklyn Park.


Qaybtaan ah laynka buluuga ah ee tareenka METRO-ga (laynka Hiawatha) wuxuu isku xirahayaa laynka Cagaarka ee METRO-ga iyo laynka dheeraynta ee Cagaarka (Qaybta Dhexe iyo Koofur-galbeedka) iyo Tareenka Northstar ee boosteejada Target Field ee Minneapolis.

Si ah qorshaynta guud ee laynka tareen mareenka, Kawntiga Hennepin wuxuu guda galay diraasad caafimaadeed oo lagu magacaabay Qiimaynta Saamaynta Caafimaadka (HIA), si loo darso si balaaran sida ay iskugu xiran yihiin caafimaadka, gaadiidka, iyo dhul markaba.

## Meesha caafimaadka, gaadiiidka, iyo dhul marka isugu imaadaan

Caafimaadka wuxuu ka bilowdaa bay'adda aanu ku nool nahay, midda aanu wax ku baranno, midda aanu ka shaqayno iyo midda aanu ku ciyaarno. Mashruucyada gaadiiidka sida jidadka waaweyn, gaadiiidka bulshada iyo marshibiyeediga, kuwaaso dhan waxay si wanaajinayaan bay'adahaas. Tareen mareenka Bottineau HIA raad wanaagsan ayuu ku reebahayaa caafimaadka bulshada ku nool boosteejooyinka tareenka agtiisa. Dhamaan dadka xaafadaha kala duwann ka imaannahaya oo raaca laynka tareenka way kawada faa'iiday sanahayaan.

Tareenka cusub wuxuu ku reebahayaa bulshada faa'iidooyin caafimaad maadaama uu wanaajinahayo heerka jirdhisqa, shaqooyinkii oo durbadiiba loo tagi karo, qarashka guryaha iyo kuwa gaadiiidkaba, nabadgalyada traafikada, wax barashadii oo durbadiiba loo tagi karo iyo helitaanka cunnada caafimaadka leh.



## Jirdhiska

### Tareen mareenka Bottineau wuxuu kordhinahayaa jirdhiska maalmeed ee dadka

Dalka guud ahaan, dadka isticmaala tareenka waxay helaan 24 daqiqo oo jirdhis ah maalinkii taasoo ka kooban sii socodka iyo soo socodka loo lugaynayo tareenka. Meelaha boosteejooyinka ee tareen mareenka waxay wanaajinahayaan bay'adda dadka baaskiilka watta iyo kuwa lugeeya, sida dhinaca marshibiyeediga iyo jihadka yaryar. Diraasadda waxay muujisay in marka ay dadka dareemaan nabadgalyo iyo xasillooni xagga baaskiil wadidda ama xagga luganyta, taasi waxay ku boorinaysaa dadka in ay dhaqdhaqaaq sameeyaan midkaas oo noqda dhaqdhaqaaq maalmeed oo joogto ah.

Tareen mareenka Bottineau wuxuu wanaajinahayaa oo sahlahayaa si loo tago jardiinada Theodore Wirth Park taaso boosteejadeeda laga dhigi karo mid u dhaw jidka Golden Valley ama Plymouth Avenue. Diraasooyinka waxay muujiyeen in marka dadka ay helaan jardiinooyinka in uu batto dhaqdhaqaaqa jirdhiska.

### Sababta taasi ay muhiim ugu tahay caafimaadka

Diraasooyinka waxay muujiyeen in dhaqdhaqaaqa uu aad muhiim ugu yahay caafimaadka wanaagsan. Laakin, kala bar oo bar dadka waaweyn iyo afar meelood saddex oo caruurta ah oo ku nool Kawntiga Hennepin ma helaan heerka dhaqdhaqaaqa lagu booriyo.

## Shaqada

### Laynka Tareen mareenka ee Bottineau wuxuu wanaajinayaa si ay bulshada boosteejooyinka eeriyada ay shaqada ku tagaan

Kordhintaa xidhiihada gaadiidka iyo shaqooyinka gobolka oo dhan ballarinaya fursadaha dadka ee shaqada. Qadka tareen mareenka wuxuu kale dhiiri-gelinayaan kobcinta dhaqaalaha iyo shaqo dheeraad ah ee bulshooyinka degaannada ku hareereysan boosteejooyinka gaadiidka.

Dhismaha iyo adeegga maalin-ka-maalin ah oo Tareen mareenka ee Bottineau sidoo kale wuxuu abuuri doonaa shaqooyinka dhismaha, iyo meelaha hawlgelinta iyo dayactirka.

### Maxay tani muhiim ugu tahay caafimaadka

Marka dadku ay haystaan shaqooyin tayo leh oo ay ku qaadan karaan mushaarka ay iskaga bixin karaan nolol dheer oo u ku dheeraanahayo cimriga iyo caafimaadka jirka iyo midka maskaxdaba. Arrimo badan ayaa saamayn kara inuu qofka shaqeeyo iyo nooca shaqada uu isagu ama iyadu leedahay. Qodob ka mid ah oo muhiim ah waa gaadiidka.

Iminka, shaqooyinka waxay faafin yihiin gobolka oo dhan, taasoo sii adkeyneysa qaalina ka dhigaysa in ay shaqaalaha oonan heli karin baabuur ay ku gaaran shaqooyinka. Meelaha qaar ka mid ah Xaafadda Bottineau, ku dhowaad boqolkiiba 60 qoysaska ma lahan gaadhi.

## Kharashka Guryaha iyo Gaadiidka

### Tareen mareenka Bottineau wuxuu yarayn karaa kharashka la isku daray ee guryaha iyo gaadiidka

Kharashka guryaha iyo Gaadiidka waa labada kharash ee ugu weyn ee qoysaska Maraykanka. Mararka qaarkood xaafadaha leh kharash yar ee guriga waxaa kor u qaadi kara oo qaalin kara in ay lagu noolaado, sababtoo ah dadku waxay u baahan yihiin in badanaa meelaha gaari u wataan sidaas daraadeedna kharash dheeraad ku bixiyaan gaadiidka.

Tareen mareenka Bottineau wuxuu caawini kara sida loo yareeyo kharashka la isku daray ee guryaha iyo midka gaadiidka, sababtoo ah xaafadaha heli kara gaadiidka, jidadka lagu lugeyn karo iyo adeegyada kala duwan waxay hoos u dhigayaan kharashka gaadiidka. Tareen mareenka cusub sidoo kale waxaa laga yaabaa inuu kor u qaado qiimaha hantida, taas oo keeneeysa horumarinta dhaqaalaha iyo kordhinta fursadaha guryaha helidda meelaha boosteejooyinka u dhaw.

Magaalooyinka, bulshooyinka iyo horumarinta waa in ay wada shaqeeyaan si loo ilaaliyo fursadaha gurya helidda meelaha boosteejooyinka u dhaw. Dadaalkaani wuxuu xaqijinahayaa in xaafadaha u dhow boosteejooyinka ay yihiin kuwo dadka dan yarta ah ay awoodi karaan.

### Maxay tani muhiim ugu tahay caafimaadka

Qoysaska kharashkooda gaadiideed u yar yahay waxaa u so haraya xoogaa dheeraad ah xagga miisaaniyadda taasina waxaa lagu khayrashayn karaa in kor loogu qaado caafimaadka sida cunto nafaqo leh iyo daryeel caafimaadeed. Miisaaniyadda uusan saarnayn culayska saa'idka ah ee gaadiidka waxay kale caawin kartaa in la yareeyo cadaadiska iyo guri la'aanta.

## Nabadgelyada gaadiidka

### Tareen mareenka Bottineau wuxuu wanaajin kara ammaanka gaadiidka

Tareenka waa mid ka mid ah foomamka ugu ammaansan ee gaadiidka la heli karo. Dad badan oo qaata tareenka macnaheedu waa in dadka isticmaali doonaa hab amaan ah iyo in ay yaraanayso shilalka gaadiidka.

Xaafadaha ku hareeraysan boosteejooyinka u dhaw tareen mareenka waxay wanaajin karaan bay'adda loo baahan yahay si loo lugeeyo ama baaskiilkka loo wado, sida marshibiyeediga iyo baaskiil mareenka. Maalgelinta noocan oo kale ah waxay yarayn kartaa khatarta ah ee dhaawaca iyo dhimasho la xiriira gaadiidka.

Cilmi baaris waxay muujinaysa in waddooyinka ammaan leh oo raaxada leh oo loogu talagalay dadka lugaynaya iyo kuwa baaskiilkka wada waxay dhiirigelinaysa si dad badan ay u lugeeyaan una wadaan baaskiil. Marka dadka ay lugeeyaan ama wadaan baaskiilkka waxaa yaraanahaya shilalka baabuurta ku lug leh dadka lugaynaya iyo kuwa baaskiilkka wada.

## Maxay tani muhiim ugu tahay caafimaadka

Dhaawacyada la xiriira shilalka baabuurta waxay saameyn ku yeelan karta tayada nolosha iyo kharashyada weyn ku baxaya dadka iyo qoysaskooda lugta ku leh. Sannadkii 2011, 5,089 qof ayaa ku dhaawacmay shilalka magaaloo yinka teedsan Tareen mareenka Bottineau.

Laga soo bilaabo 2001 ilaa 2011 Gobolka Minnesota waxaa shilal ku dhintay 5,094 qof. Sanadkii 2011 oo keliya, waxaa dhacay wax ka badan 72,000 shil oo baabuur ah taaso keentay in 368 qof ay ku dhimato gobolka oo dhan. Geeridaas oo 368 ah waxaa ka mid ahaa 40 ahaayeen dadka lugaynayey.

## Helitaanka Waxbarashada

### Tareen mareenka Bottineau wuxuu sahlahayaa helitaanka goobaha waxbarashada iyo kuwa xirfadaha

Tareen mareenka Bottineau wuxuu isku xirayaa dadak aadahaya Kulliyadda North Hennepin Community College iyo hay'adaha kale ee tababarka waxbarashada iyo kuwa xirfadeed ee degaanka xaafadda mashruuca uu ka socdo.

**"Waxaan ku nooshahay meel kulliyadda u jirta 11 mayl waxaana iga baxa gaariga 8 doolar oo shidaal ah maalinkii. Ma jiraan fursado gaadiid kale xaafaddayda sidaas darteed baabuurka waa sababta kaliya ee awoodaan inaan u tago kulliyadda."**  
**Arday dhigta North Hennepin Community College**

## Maxay tani muhiim ugu tahay caafimaadka

Marka ay dadku waxbarataan waxay kor u qaadahayaan fursadaha ay shaqo wanaagsan oo lacag fiican bixiya oonan lahayn xaaladaha khatarta ah ama caafimaad la'an ah. Wuxa kale oo oo u siyaadahaya aqoon iyo xirfado wax u tarahaya si ay u helaan macluumaadka caafimaad iyo khayraadka ee ay u baahan yihiin. Iminka, ardayda qaar ka mid ah oo ku nool Degmada Kawntiga Hennepin waxay u arkaan baabuur la'aanta iyo kharashka gaadiidka ee aad u sareeya in uu ka xannibahayo dhigashada kulliyadda.

## Helitaanka cunto caafimaad leh

### Tareen mareenka Bottineau wuxuu hagaajin kara helitaanka cuntada caafimaadka leh

Maalgelinta meelaha boosteejooyinka u dhow waxay dhiiri gelinaysaa in laga ag furo dukaamada cuntada. Tareen mareenka Bottineau sidoo kale waxay caawineysaa in qoysaska agagaarka ku nool inuu kharashka gaadiidka uu yaraado taasoo keeneysa in dakhligooda cuntooyin nafaqo leh in uu kordho.

**"Waxaan isticmaalaa gaadiidka dadweynaha maalin walba taasina waxa in aan kaydsado kumanaan doolar oo aan awal ku bixin lahaa baarkinka. Lacagta aan kaydsaday waxay sabab u noqotay in aan awodo in aan soo iibsado raashin caafimaad qabaa. ... Sidoo kale, isticmaalka gaadiidka dadweynaha wuxuu yareeyey kharashka ku bixilahaan baabuurka, lacagtaas way ii soo hartay maadaama aanan u isticmaalayn dayactirka baabuurka." Qof deggan Kawntiga Hennepin**

### Maxay tani muhiim ugu tahay caafimaadka

Nafaqo wanaagsan waxay muhiim u tahay caafimaadka, korriimada carruurta, iyo ka hortagga cuduradda. Marka ay dadku helaan fursado ay ku cunaan cunto caafimaad leh waxay awood u leeyihiin in ay cunnadaas caafimaadka leh ay ka mid noqoto waxa ay cunaan.

**In ka yar saddex meelood hal meal dadka degan ku nool magaalooyinka ku heeraarsan Tareen mareenka Bottineau ayaa cunta miraha iyo khudaarta xooga loogu taliyo.**

## Caafimaadka Wanaagsan ee Dadka oodhan

### Tareen mareenka Bottineau wuxuu caawini kara oo dhiirrigelin karaa caafimaadka wanaagsan ee bulshooyinka ku danta yar

Kawntiga Hennepin gudihiiisa, bulshooyinka dakhliga yar iyo bulshooyinka midabka leh waxaa ku badan heerka dhibaatooyinka caafimaadka oo laga hortegi karo sida cayilka iyo sokorowga nooca labaad marka loo eego dadka cadaanka ah iyo kuwa dakhliga sare.

Kala duwanaantan ee caafimaadka waxaa sabab u ah dhaw waxyaabood sida: dhaqaalaha, siyaasada bulshada, siyaasadda, iyo bay'adda. Waxaa muhiim ah in faa'iidooyinka caafimaad-dhiirigelinaya ee tareen mareenka inuu gaaro bulshooyinkaas. Saamaynta caafimaadka ee Tareen mareenka Bottineau ku reebahayo bulshooyinkaas waxay ku xidhan tahay dadaalka si loo hubiyo inay qaadan karaan tareenka.

## Hawlaха lagu talinayo

Iyada oo ku saleysan natijjooyinka Bottineau HIA, shaqaalaha Kawntiga Hennepin iyo Guddiga La Talinta ee Bottineau HIA waxay go'an ka gaareen hawlaха lagu taliyay.

Liiska hoos ku qeexayaan shan hawlaха lagu taliyay ee Kawntiga Hennepin, Guddiga Magaala iyo magaalooyinka ka heeraarsan Tareen mareenka Transitway Bottineau ah si loo horumariyo saamaynta wanaagsan ee khadka tareenka ku yeelanahayo caafimaadka. Taloooyinka dheeraadka ah ee ku qoran warbixinta buuxda waxaad ka heli kartaa [www.hennepin.us/bottineauhia](http://www.hennepin.us/bottineauhia).

### Ficil lagu talinayo ee 1aad

**Xisbiyada mas'uulka ah:** Magaaloyinka, Kawntiga Hennepin iyo Guddiga Magaalooyinka

Samee diraaso dheeraad ah si loo aqoonsado dadka dakhligoodu yar yahay iyo dadka gaadiidka dadweynaha qaata ee ku nool jid mareenka tareenka oo si fudud ku xidhi kara laynka tareen mareenka iyo midka baska ama mid tareen kale.

**Fikradda:** sameynteeda diraaso dheeraad ah oo ka caawin karta si loo hubiyo, dadka dakhligoodu yar yahay iyo dadka gaadiidka dadweynaha qaata in ay heli karaan khadka tareenka cusub iyo noocyada badan ee faa'iidooyinka caafimaad ee la xiriira.

## Ficil lagu talinayo ee 2aad

**Xisbiyada mas'uulka ah:** Magaaloyinka, Kawntiga Hennepin iyo Guddiga Magaaloooyinka

Sii wad dadaalka lagu wacyigeliyo shacabka dadka ku nool hareeraha waddada ee jid mareenka ee mashruuca Tareen mareenka Bottineau, gaar ahaan dadka laga tiro badan yahay, dadka aan luuqadda Ingiriiska ku hadlin iyo bulshooyinka dakhliga yar.

**Fikradda:** sameynta dadaalka ka qayb galka shacabka ballaaran wuxuu caawin kara laynka tareen mareenka iyo gaadiid mareenka si hab fican loogu adeego bulshadaha tiradoodu yar tahay iyo sida loogu sahli lahaa helidda gaadiidka.

---

## Ficil lagu talinayo ee 3aad

**Xisbiyada mas'uulka ah:** Magaaloyinka, Kawntiga Hennepin iyo Guddiga Magaaloooyinka

Bartilmaameedka koritaanka guryaha degaanka iyo ganacsiga goobaha boosteejooyinka iyo hirgelinta xuduudda dhulka, shuruudaha la dhigto ee baarkinga baabuurtta iyo xeerarka u yaala dhismeyaasha in dhiiri cufnaanta sare, horumarinta isticmaalka isku dhafan in ay ka faa'iideysan doonaan bulshooyinka hadda jooga iyo kuwa mustaqbalka.

**Fikradda:** beegsanayo korinta meelaha boosteejooyinka waxay caawin doontaa kobcinta fursadaha gaadiidka shaqooyinka lagu tagilahaa iyo in la kordhiyo fursadaha guryaha ku yaala xaafadaha kharashka gaadiidka hoose u dhacsan yahay. Cufnaanta sare, horumarinta isticmaalka isku dhafan waxaa helitaankeeda u badan yahay dadka gaadiidka guud ku xiran, taasoo oonan u baahnayn gaari wadid badan iyo sidoo kale waxay keeni kartaa bay'ad wanaagsan oo lagu lugayn karo.

---

## Ficil lagu talinayo ee 4aad

**Xisbiyada mas'uulka ah:** Magaaloyinka iyo Kawntiga Hennepin

Isku darka wanaajinta saldhiga dadka lugeeya iyo kuwa baaskiillada wada ee meelaha boosteejooyinka.

**Doqon:** Isku darka wanaajinta saldhiga dadka lugeeya iyo kuwa baaskiillada wada ee meelaha boosteejooyinka waxay wanaajinaysaa ammaanka gaadiidka iyo waxayna sahlaysaa si dadka lugaynahaya kuwa baaskiilkha wada ay ku helaan tareenka. Sidoo kale, waxaa dheeraad ah in ay ka caawini karto kordhinta fursadaha loogu talagalay dhaqdhaqaqa jirka. In la fududeeyo tareen helidda ee dadka lugeeya iyo kuwa baaskiilkha wada waxay wanaajinayaan karaa koboca dhaqaalaha loogu talagalay ganacsiyada ku heraarsan.

---

## Ficil lagu talinayo ee 5aad

**Xisbiyada mas'uulka ah:** Magaaloyinka iyo Kawntiga Hennepin

Dhawrista guryaha hadda jira oo la awoodi karo iyo taageeridda guryaha dadka dakhligooda kala duwan yahay oo u dhow goobaha boosteejooyinka tareen mareenka isticmaalahaya xeeladaha lagu guuleysto ee maalgelinta ee la xiriira gaadiidyada dalka oo dhan.

**Fikradda:** Dhawrista guryaha hadda jira oo la awoodi karo iyo taageeridda fursadaha guryaha kala duwan ayaa caawini kara si loo hubiyo, bulshooyinka isticmaalada gaadiidka dadweynaha, kuwa laga tira badan yahay iyo kuwa dakhligoodu hooseeyo in ay helaan khadka cusub ee tareenka iyo ugu dambeyntii in ay wanaajiyaan caafimaadkooda.

## Ka Qaybqaado Marwalbe

Natijjooyinka ka soo baxa HIA Bottineau waxaa loo isticmaali doonaa sida loo qorshayn lahaa Tareen mareenka Bottineau. Qorshaynta meelaha boosteejooyinka waxay bilaaban doonaan horaanta sanadka 2014 ee Minneapolis iyo Golden Valley.

Kawntiga Hennepin wuxuu la shuraako la galayaa Nexus Community Partners iyo hay'addo kale si ay bulshooyinka tareen mareenk Bottineau agtiisa deggan loo dhiiri galiyo iyo si qorshaynta loogu daro tixgalinta caafimaadka.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad uga qayb qaadan kartid arrinkaan, fadlan la xiriir Denise Engen taleefankeedu yahay 612-348-4454 ama iimayl u dir [Denise.Engen@hennepin.us](mailto:Denise.Engen@hennepin.us).

## Dib u eeg warbixinta ugu dambaysta

Siyaaboyin kala duwan baa la isticmaalay si loo ururiyo dadka xaafadda deggan ra'yigooda. Kuwaas waxaa ka mid ahaa in guddi la taliye ah la isugu yeero, in la wareeysto dadka lug ku leh mashruuucu, iyo in qayb qayb looga munaaqashoodo arrintaan. Mashruucaan Bottineau HIA waaxaa kale oo ka mid ah in si ballaaran loo darso suugaanta, macluumaadka asliga ah, iyo diraasooyinkii hore ee lagu sameeyey degmada.

*Diraasadaan oo dhamaystiran, 130 bogg, waxaa laga heli karaa [www.hennepin.us/bottineauhia](http://www.hennepin.us/bottineauhia).*

Qofkii doonaya diraasadaan oo dhamaystiran ayadoo waraaqo ah wuxuu ka heli karaa maktabadaaha Kawntiga Hennepin ee soo socda: Brookdale, Brooklyn Park, Golden Valley, Rockford Road and Sumner.

---

Qiimaynta Saamaynta Caafimaadka Tareen mareenka Bottineau waxaa maal galley Health Impact Project, taasoo ah wada-shaqayn ka socoto ururka Robert Wood Johnson Foundation iyo Pew Charitable Trusts, kuwaaso laftigooda ay maal galisay caymiska Blue Cross and Blue Shield of Minnesota Foundation. Aaraa'da halkaan ku kooban waa kuwo gaar u ah qoraa iyo dadki wax ku biiriyay mana ahan laasim kuwa ka socda ururada Health Impact Project, Robert Wood Johnson Foundation, The Pew Charitable Trusts ama caymiska Blue Cross and Blue Shield of Minnesota Foundation.

---



**Hennepin County**  
Public Works

Hennepin County does not discriminate and provides equal access to employment, programs and services without regard to race, color, creed, religion, age, sex (except when sex is a bona fide occupational qualification), disability, marital status, sexual orientation, public assistance status, socio-economic status, education, ethnicity and/or national origin. If you believe you have been discriminated against, contact the Human Resources Department, A-400 Government Center, 300 S. Sixth St., Minneapolis MN 55487, or call 612-348-2163. (9/09)